

Janaalada telefishinnada oo dhan waxay laga billaabo guga 2025 u wareegayaan tebinta HD

Waa maxay tebinta HD?

Tebinnada HD waa tebinnada muuqaalkooda sarreeyo. Xubnaynta sare waa farsamo loo kaashado in sawirka iyo codka barnaamijyada telefishinku ay noqdaan kuwa ka fasiixsan sidii hore. Janaalada telefishinnada oo dhan waxay laga billaabo guga 2025 u wareegayaan farsamadan.

Mustaqbalka waxaad u baahantahay qalab ku habboon farsmada HD. Waxaa laga yaabaa in aad heysato telefishin ama dhigiboksi ku habboon ama waxaa qasab kugu noqon kara in aad qalab cusub iibsato.

Sidan ugu diyaargarow farsamada HD:

1. Hubi in telefishinkaada ay ka muuqato tebinta HD

Fur liiska janaalada telefishinka, ytacni liiska j anaalada tv:ga iyo barnaamijyadooda.

Fiiro, in dhammaadka magacyada janaalada ay ku qoran yihiin xarfaha HD. Xarfuhu waa calaamadda janaalka HD.

Ka dooro liiska janaalada hal janaal oo HD ah. Haddii aad barnaamijkiisa aragto, uma baahnid in aad telefishin ama dhigiboksi cusub gadato.

Haddii aadan barnaamijka ka arkin janaalka HD, waxaad u baahantahay in aad soo gadato telefishin ama dhigibokis cusub.

2. Soo ogow, in gurigaada ay ku jirto shabaqa anteenada ama shabakadda fiilada ah

Barnaamijyada telefishinku waxay markasta soo maraan shabakadda.

Odayga shirkadda guriga ayaa og shabakadda guriga ku jirta nooca ay tahay.

Haddii aad deggantahay guri aad adigu leedahay saqafkana ay saarantahay anteenada qaabka fargeetda u samaysan, waxay u

dhowdahay in ay guriga ku jirto shabakadda anteenada.

Haddii ay anteenadu fiicantahay, laakiin aadan arkayn janaalada HD, soo gado telefishin ama dhigiboksi cusub.

3. Soo gado qalab ku habboon shabakadda gurigaada

Haddii aad u baahantahay telefishin ama dhigiboksi cusub, u sheeg iibiyaha dukaanka telefishinka, in gurigaada ay ku jirto shabakadda anteenada ah ama tan fiilada ah. Qalabka cusub waa in uu leeyahay daare HD ah oo ku habboon shabakaddan.

Telefishinnada iyo dhigiboksiyada cusub badankood waxay waayadan leeyihiin daaraha HD.

Inta badan waxaa ku jira daarayaasha shabakadda anteenada iyo shabakadda fiilada.

4. Dib u isticmaal qalabka duqda ah

U qaadi telefishinka ama dhigiboksigu duqa ah dukaankada qalabka elektroonigga ah lagu gado ama goobta goobta alaabta dib loo isticmaalo la geeyo.

Macluumaadka dheeraadka ah ee u wareegista HD ka heleysaa cinwaanka: